*Ogolaanshaha Baaritaanka Ilmaha Caafimaadka leh ee Kaaliforniya*

***Sanadka Dugsiga 2022-23***
***DUGSIGA HOOSE***

Waalidka ama Ilaaliyaha Mudan:
Ardaygaaga ayaa laga codsanayaa inuu ka qayb-noqdo U Kuurgalka Caruurta Caafimaadka Qabo ee Kaaliforniya (California Healthy Kids Survey [CHKS]) ay soo bandhigayso Waaxda Wax Barashada Ee Kaaliforniya (California Department of Education [CDE]). U kuurgalkaan waa mid aad muhiim u ah oo wax ka caawinaayo in dhalinyaradeena lagu dhiiri-geliyo caafimaad iyo wanaagsanaan fiican, in la fiicnaysiiyo deegaanka wax barashada ee dugsiga, iyo in la'la dagaalo dhibaatooyinka sida ku xadgudubka daroogada iyo rabshada. *Qasab ma'aha ilmahaaga inuu qaato baaritaanka. Qayb-qaadashada waa mid ikhtiyaari ah waxayna u baahan tahay ogolaanshahaaga.*

**Waxa Ku Jiro U Kuurgalka**. Wuxuu u kuurgalka uruuriyaa macluumaad ku saabsan taageeraha horumarka oo la siiyo dhalinyarada; isku xirnaanta dugsiga iyo caqabadaha wax barashada, iyo sidoo kale dhaqamada sida dhaqdhaqaaqa jirka iyo caadooyinka nafaqada; khamriga, tubaakada, iyo isticmaalka kale ee daroogada; iyo amniga dugsiga.

Waxaad xogwareysiga ka baari kartaa xafiiska dugsiga ama websaytka degmada dugsigaaga[https://sandiegounified.org/departments/counseling_and_guidance/cal-schls](https://sandiegounified.org/departments/counseling_and_guidance/cal-schls) Waxaa natiijooyinka u kuurgalkaan la isugu geeyaa war-bixino loo yaqaano CHKS Reports oo ah heerka degmada dugsiga iyo heerka deegaanka. Si aad u aragto koobiga war-bixinta degmada dugsigaaga, aad https://calschls.org/reports-data/search-lea-reports/ (meel ka baxsan degmada dugsiga [Outside Source]) markaasna ku qor magaca degmada dugsiga.

**Waa Ikhtiyaari**. Ardayda ka qayb-qaato, iyagoo haysto ogolaanshahaaga ma ku qasbano inay ka jawaabaan su'aalaha ay rabin inay ka jawaabaan, iyo waqtiga ay rabaan ayey istaajin karaan qaadashada u kuurgalka.

**Magacaaga Waa la Qarinayaa**. Magacyo lagu ma'qoro ama raacsiiyo foomamka baaritaanka ama maclumaadka. Natiijooyinka waxaa loosoo bandhigayaa kala dhig-dhigid haday jirto nidaamyo xukun oo si adag loogu ilaalinaayo sirta bas.

**Qaadashada**. Waxaa u kuurgalka la bixin doonaa marki ay tahay [DATE OF SURVEY ADMINISTRATION].

**Khatarta Suurtagalka Ah.** Ma jirto khatar la ogyahay oo ku imaan karto jirka cunugaaga. Khatarta waxyeeli karto maskaxda ama dhaqanka aad ayuu u yar yahay. Mar jiro wax la soo sheegay 20'kii sanno ee la bixinaayay u kuurgalka. Marar dhif ah, waxaa laga yaabaa in su'aalaha lagala kulmo wax yar oo dhibsasho ah. Adeegyada la'talinta ee dugsiga ayaa diyaar u ahaan doono inay ka jawaabaan wixi su'aalo gaar ah oo laga yaabo inay soo baxaan.

**Hadii Aad Rabto Macluumaad Dheeraad Ah**. Waxaa u kuurgalka loo sameeyay CDE, waxaana u sameeyay WestEd, oo ah wakaalad wax barashada oo u shaqeyso faa'iido la'aan oona loogu talagalay dadweynaha. Hadii aad wax su'aalo ah ka qabto u kuurgalkaan, ama kuwa ku saabsan xuquuqdaada, degmada dugsiga ka wacSharon Rubalcava, 619.725.7255 - Program Manager of Counseling and Guidance.

---

**Foomka Ogolaanshaha Waalidka oo loogu talagalay Baaritaanka Ilmaha Caafimaadka leh ee Kaaliforniya**

Fadlan hoos ku calaamaday hadii aad bixisay ogolaansho, saxiix, iyo kusoo celi foomkaan saddex maalmood gudahooda, oo waxaad u soo celisaa macalinkii qaybiyay.

___ Waxaan ***bixiyay ogolaansho*** inuu cunugayga ka qayb-qaato U Kuurgalka Caruurta Caafimaadka Qabo Ee Kaaliforniya (California Healthy Kids Survey).

___ Ma ***bixinin ogolaansho*** inuu cunugayga ka qayb-qaato U Kuurgalka Caruurta Caafimaadka Qabo Ee Kaaliforniya (California Healthy Kids Survey).

Saxiix: Taariikhda:

Magaca Ilmahayga waa:

(Fadlan Qor)

MAHAD SANID MAADAAMA AA SOO BUUXISAY IYO SOO CELISAY FOOMKAAN OGOLAANSHAHA.